



La kulan kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah ee cusub: Yousef Awwad

Wuxuu ka yimid magaalo durugsan oo ku taala Urdun isaga oo yimiday dugsiyada degmo ee ugu weyn ee Oregon.

Markii ay da'diisu ahayd 5 jir, Yousef Awwad wuxuu walaalihiisa ka weyn kula soo biiray jihadka Ghweria, Urdun, magaalo yar oo ku taala duleedka Zarqa, si uu gado macmacaanka sisinta iyo buufinta 'balloon' si uu cuntada uga dhigo mid saaran miiska qoyskiisa.

Yousef aabihiis wuxuu ka tirsanaa ciidamada Urdun isaga oo ku sugnaa meel ka tirsan lama degaanka dhexdiisa oo aad u durugsan isaga oo awoodi waayay in uu lacag u soo diro guriga intii uu halkaasi joogay.

Maanta, Yousef wuxuu u shaqaynaya isaga oo ah kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah ee cusub ee dugsiyada degmo ee ugu weyn Oregon. Sidee baa wiil saboolnimo ugu noolaa magaalo durugsan oo ku taala Urdun ugu soo dambeeyay halkan?

"Wax mar walba nolosheyda ku beernaa waxay ahayd in aan marnaba cabsan," ayuu sheegay.
"Waxaan mar walba ogaa in haddii aan wax niyadda geliyo, in aan samayn karo. Waxaan helay jidkii."

Yousef waxaa calaamad u ah safarkiisa sida uu uga guuleystay waxyaabihii uu soo maray.

Wuxuu shaqadiisa guri ku qabanayay iftiinka shamaca, isaga oo hadana ka qalin jabiyyay oo kaalinta sare ka galay fasalkiisa dugsiga sare; waxaa loo oggolaaday mid ka mid ah kaliya saddex jaamacadaha dadweynaha ee ka jira Urdun; isaga oo, ka dib markii uu ka qalin jabiyyay, shaqo ka helay Bangiga Carabta.

Inkasta oo uu helay deganaansho dhanka shaqada ah oo cusub, Yousef wuxuu sheegay in uu rabay in uu arko dunida. Markii uu ahaa 25 jirka, wuxuu ka soo tegay noloshiisi uu ku haystay Urdun isaga oo u soo guuray Maraykanka.

Ka dib markii uu muddo kooban ku dhex noolaa bulsho Carab ah oo ka tirsan Los Angeles, Yousef wuxuu dib u degay bartamaha-galbeedka 'mid-west' halkaasi oo aanu awoodayn in uu isticmaalo kuwa ku hadlayay luqaddiisa hooyo, wuxuu sheegay, in ay u noqdaan "ushii dhaqan ahaan la qabsanayay."

"Dadka intooda badani waxay ku dhagaan dhaqankooda marka ay u soo guuraan Maraykanka," ayuu sheegay. "Waxaan doonayay in aan Ingiriisiga ka barto dadka ku hadla ee uu yahay afkooda hooyo."

Wuxuu sheegay in intii suurta galka ah uu la hadli jiray dadka badan oo uu aanu garanayn. Inkasta oo si degdeg ah ula qabsaday luqadda, hadana waxaa jiray qaar ka mid oo madaxiisa ka weynaaday. "Waxaan xasuustaa markii ugu horaysay ee aan baranayay Ingiriisiga, dadka oo ii sheegaya kaftan aniguna aanan fahmayn. Oo uu qof kastaa qoslayso anigu aan fiirinayo oo aan is dhahayo, "Maxay ku qoslayaan? Maxay u tahay mid aad u qosol badan?" Ka dibna waxa aan ogaaday in sababtu ahayd macnaha guud ee dhaqanka oo aanan fahmin."

Iyada oo fikraddu ka dhalatay hadal dhexmaray boostaale, Yousef wuxuu fiirsaday liiska in ka badan 100 filim Maraykan ah oo heer sare ah-laga soo bilaabo filinkii *Dumb and Dumber* ilaa laga gaarayay filinkii *The Godfather*, laakiin filimka ku soo noqnoqday wuxuu ahaa filinkii *Gone with the Wind*.

“Waxaan xasuustaa, [Scarlett O’Hara] oo gacanteeda ku haysa ciid/carro isla markaana oranaysa ‘Marnaba gaajoon maayo mar kale.’ Goobtaasi waxay xiriir la lahayd nolosheyda.”

Yousef wuxuu waxbarashada uu ku takhasusay ka bilaabay Waaxda Waxbarashada ee Arizona isaga oo, ka dibna, Dugsiyada Middoobey ee Degmada Tucson ka noqday Madaxa Mas’uulka Dhaqaalaha. Doorkaasi uu lahaa, wuxuu ku helay Abaalmarinta Guddoomiyaha Gobolka Arizona qaybtii uu ka qaataay dhagax dhiga mashruuca tamarka qoraxda oo hada bixiya boqolkiiiba 80 korontada degmada. 2014-kii, waxaa shaqaalaysiisay PPS si uu u noqdo Madaxa Mas’uulka Dhaqaalaha. Dayrtii 2016-kii, waxaa loo dalacsiiyay in uu noqdo Ku xigeenka Madaxa Sare ee Mas’uulka Fulinta.

Yousef wuxuu sheegay in habkiisa gaar ahi uu yahay in si naxariis leh wax loo hoggaamiyo isla markaana si firfircooni loo dhageysto – shaqaalahaaga iyo dadka aad u adeegto. Laakiin ta ugu muhiimsan, wuxuu aaminsan yahay in haddii shaqaalaha PPS ay ka fikiraan ardayda ay u adeegayaan go’aan kasta oo ay gaaraan, in markaa degmada iyo ardaydu ay guulaysan doonaan.

“Mudnaanteena koowaad waa in ay mar walba noqotaa ardayda sababta oo ah waxay yihiin sababta aan halkaan u joogno,” ayuu sheegay. “Waxba qaldami maayaan haddii aan diiradda saarno carruurta.”